

# **Siyaasadda KE- Walaaca iyo Cabashooyinka Dadweynaha**

Wax ka sheegida ama naqdiga wax ku oolka ah kaasi oo uu kicinayo rabitaan daacad ah oo uu qofku rabbo in uu ku hormariyo kuna wanaajiyo tayada barnaamijka waxbarashada ama in uu qalabeeyo dugsiyada si hawlhooda ugu sameeyaan qaab aad waxtar u leh way soo dhowaynayaan Guddiga Waxbarashadu.

Guddigu wuxuu aaminsanyahay in cabashooyinka iyo walaaca sifiican loola dhaqmi karo loona xalin karo intiiba ay ku dhowyihiin asalkooda ee suurto galka ah intiiba mushkiladu cusubtahay. Sidaad daraadeed, qaabka ugu fiican ee loo wareejin karo cabashooyinka ku lugta leh waxbarashada, anshaxa ama barashada maadooyinka waxay noqon doontaa sidaan soo socota:

1. Macalin
2. Maamule
3. Maamulaha iyo guddiga wadashaqaynta ee go'aan qaadashada
4. Isku duwaha/Kalkaaliyaha Maareeyaha
5. Maareeye
6. Guddiga Waxbarashada

Cabasho kasta oo ku saabsan shaqaalaha dugsiya waxaa marwalba dib loogu wareejinayaa kanaalo maareyn oo wanaagsan kahor inta aan la hor dhigin Guddiga si uu ahmiyad u siiyo waxna uga qabto.

Tababarka hada ah waxaa la lambareeyay 1993

Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

La muraajaceeyay: 5 Maajo, 1998